XARUMAHA DADKA CUSUB EE DPS

UJEEDADA:
Xarumaha Dadka cusub waa barnaamij laga bixiyo iskuulo gaar ah oo DPS kamid ah kaasoo lagu caawiyo ardayda kucusub Maraykanka, aana sifiican u aqoon Ingiriisiga, waxbarashadu kakala go'day markay wadankooda joogeen kuwaasoo dhiganaayay iskuulada Maraykanka wax kayar hal sano. Xarumaha Ardayda Cusub, ardaydu waxay bartaan xirfadaha kacaawiya inay kuguulaystaan iskuulada Maraykanka, waxayna baranayaan aasaaska Ingiriisiga ee akhriska, qoriska iyo xirfadaha xisaabaadka. Inta badan ardayda cusub waxay joogaan barnaamijka Xarumaha Ardayda cusub mudo hal ama labo simistar ah, ilaa ay udiyaar garoobaan inay galaan iskuulkay rabaan.

GOOBAHA XARUMAHA ARDAYDA CUSUB:

Ikuulada Hoose	Iskuulada Dhexe	Dusiyada sare
Isabella Bird Community School 2701 Lima St. Denver, CO 80238 (720) 423-9990 Webseetka Iskuulka **Place Bridge Academy (K-5)** 7125 Cherry Creek N. Dr. Denver, CO 80224 (720) 424-0960 Webseetka Iskuulka	**Merrill Middle School** 1551 S. Monroe St. Denver, CO 80210 (720) 424-0600 Webseetka Iskuulka	**Abraham Lincoln High School** 2285 S. Federal Blvd. Denver, CO 80219 (720) 423-5000 Webseetka Iskuulka **DCIS Montbello (6-12)** 5000 Crown Blvd., Denver, CO 80239 (720) 423-5900 Webseetka Iskuulka **South High School** 1700 E. Louisiana Ave. Denver, CO 80210 (720) 423-6000 Webseetka Iskuulka

U AQOONSIGA ARDAYGAA KA ARDAY CUSUB AHAAN:
Shaqaalaha xafiiska iskuulka gurigaaga waxaa loo tababaray inay kula shqeeyaan adiga iyo qoyskaaga si go'aan looga gaaro meesha lagaynaayo ardaygaaga. Waxaa laguu gudbin karaa Xarun Ardayda cusub oo kugu haboon si qiimayn dheeri ah loogu smaeeyo hadii ardaygaagu uu buuxiyay dhamaan shuruudaha soo socda:

- ❏ Ardaygu wuxaa laga kala gooyay waxbarashada ama waxbarsho quman masoo marin
- ❏ Natiijada Meelaynta ee W-APT waxay muujinaysaa in ardaygu uusan aqoon fiican ulahayn Ingiriisiga. Hadii natiijada W-APT aysan diyaar ahayn, ardaygu wuxuu muujiyaa aqoontiisa ugu hoosaysa ee luuqadiisa hooyo iyo Ingiriisiga.
- ❏ Ardayga waxaa, meeshii ugu horaysay ee lageeyay, laga qoray iskuul kuyala Maraykanka mdo labo simistar ah ama kayar.

DPS waa degmo kussinaysa dookh, taaso ah in ardaygaaga aad wax kubari karto guriga, iskuulada ELA, Xarunta Ardayga Cusub, ama uu kaqayb galo hawsha Dookha Iskkulka si aad cunugaaga uga qorto iskuulkaad rabto oo DPS kamid ah. Iskuulka DPS ee ugu dhaw gurigaaga iyo Iskkulada leh ELA waxaa laga yaabaa inaysan cunugaaga udiidin awoodiisa luuqada awgeed.

GAADIIDKA:

Ardayda Dugsiga Hoose: Gadiid ayay leedahay Xarunta Ardayda cusub hadii ardaydu kunool yihiin meel xarunta kafog wax kbadan hal mile.

Ardayda Dugsiga Dhexe: Gadiid ayay leedahay Xarunta Ardayda cusub hadii ardaydu kunool yihiin meel xarunta kafog wax kbadan labo 2.5 mile.
Ardayda Dugsiga Sare: Basaska dadwaynaha ayaa qaada ardayda ayadoo loosiimaraayo RTD ardayda kunool 3.5 miles meel ujirta Xarunta Ardayda cusub.

XARUNTA ARDAYDA CUSUB MAKUHABONTAHAY ARDAYGAYGA?
Xarumaha Ardayda cusub waxay aad ugu wanaagsan tahay ardayda si ay ubartaan wadankooda cusub, luuqadooda cusub iyo iskuulkooda cusub; laakiinqoysasku waa inay kafakaraan waxyaabo kale oo kaladuwan markay kafikirayaan iskuulka ardaygooda kubiiraayo.

Dookha Waalidka iyo Ardayga: Waad kucusbaan kartaa hawsha diiwaangalinta ee DPS. Maadaama aan nahay degmada dookha, dhamaan ardayda iyo waalidiintoodba waxay xaq uleeyihiin inay galaan iskuulkay rabaan, taasoo macneheedu yahay in iskuul kasta oo kuyaala DPS u diyaar uyahay inuu wax baro dhamaan ardayda, ayadoon laga fiirinayn heerkooda waxbarasho, aqoontooda luuqadeed, iyo luuqadooda hooyo.

Caruurta iyo qoyska: Waa macquul inaad caruurta, ilma adeerada, qaraabada, dariska, iyo dadka kale ee iskuxiran tihin aad galisid isku iskuul, taasna waa CAADI. Kaliya in ardaygaagu xaq uyesho Xarunta Ardayda cusub, macnaheeda maaha inay iskuulkaas gaarka ah dhigtaan. Iskuladu waa inay ixtiraamaan meesha aad rabto inaad ardaygaaga gayso.

Gaadiidka:
Ardayda Dugsiga Hoose: Hadii aysan ardaydu kunoolayn meel udhaw xarunta basaska, waa inay mudo lugeeyaan si ay kutagaan baska ugu dhaw. Waxaa intaas dheer, in aad Dhigato Xarun ardayda cusub macneheedu waa in cunugaagu baska iskuulka saarnaanaayo saacad subaxii ah iyo saacad galabkii ah, taaso ah inaad kafakarto markaad rabto inaad Xarunta Ardayda Cusub gayso.
Ardayda Dugsiga Sare: Maadama ardayda waawayn ay raacaan basaska dadwaynaha, taas macnaheeda waa in ardaydu ulugeeyaan xarunta basaska aalaseeyda hore kahor intaan qoraxdu soobxin, iyo saacadaha fiidkii, waxayna isku badali karan basas kala duwan inta ardaydu magaalada soodhex marayaan.

MAXAA XIIGA>
Hadii ardaygaaga lagaynaayo Xarunta Ardayda Cusub, waad qori kartaa adoo buuxinaaya foomka diiwaangalinta Xarunta Ardayda cusub kadibna keenaaya xafiiska iskuulka. Waxaa kulasoo xariiraaya Xarunta Ardayda cusub si ay kuugu sheegaan waxaad marka xigga samaynaysid.

Hadaad doorato inaad ardaygaaga kahorto iskuulka dariska kula ah ama Iskuulka leh ELA ee kuugu dhaw, shaqalaha xafiiska ayaa kusiinaaya dukumiintiyada muhiimka ah si aad udhamayso diiwaangalintooda iskuulka.